



Na waydii!

Anaga oo ah shaqaalaha rugta buugagga waxaan had iyo jeer heegan u nahay in an ku caawinno. Wixii aadan fahmin na waydii an ku qeexne.

Xarumaha buugagga magaalada Västerås waxaad ka heleysa degmooyinka Bäckby, Irsta, Råby, Skiljebo, Viksäng iyo Önsta-Gryta.

Baaska buugagga

Waxaad buug ka amaahsan kartaa baaska buugagga . Baas buugagga sida ayaa wuxuu ku wareega goobaha ka fog bartamaha magaalada Västerås.

Baaska buugagga wuxuu kaloo taga miyiga magaalada.

Biskopsgatan 2
721 87 Västerås
Tal: 021-39 46 01

www.bibliotek.vasteras.se
www.facebook.com/vasterasstadsbibliotek

Photo : ©Fotograf: Pia Nordlander, bildn.se

Sidatan ayaa
buugag rugta
bu u gagga
looga amaahda

Ku soo-dhowaada
rugta buugagga
magaalada
Västerås!



VÄSTERÅS STAD

Somaliska 2015-01



VÄSTERÅS
STADSBIBLIOTEK

Kaarka amaahda

Buugag waxaad ka amaahan kartaa rugta buugagga haddii aad haysato kaarka amaahda. Kaarka amaahda waa lacag la'aan. Laakinse waxaa kaarka lagu siin karaa haddii aad haysato kaarka aqoonsiga.

Carruurta iyo dhallinyarada da'dooda 15 sano ka horeeyso waxaa kaarka amaahda la siin karaa haddii waalidintooda ay raali ka yihiin.

Lambarka siirta

Lambar sir ah ayaa lagu siinayaa markii kaarka amaahda lagu siiyo. Lambarka sirta wuxuu ka kooban yahay afar lambar. Waa inaad kuwaas adeegsata markii buugag aad ka amaahaynayso mashiinka *utlåningsautomat*.

Kaarka amaahda dhaqaalayso

Adiga ayaa mas'uul ka ah waxaad rugta ka amaahato. Marna qof kale ha u oggolanin in kaarka amaahda uu buugag ku amaahdo. Teeda kale, waa inaad daahid la'aan na wargelisa haddii kaarka amaahda u ka lummo.

Ka amaaho adigoo bogga Internetka adeegsanaayo

Bogga Internetka
www.bibliotek.vasteras.se
Waxaad ka akhrisan kartaa buugagga rugta buugagga yaalaan.
Waxaad kaloo ka akhrisan kartaa warbixin ku saabsan buugagga aad amaahatay.

Goorma layga raba in an buugagga soo celiyo?

Buugagga waa inaad soo celisa afar toddobaad gudahooda. Haseyeeshe fiilamada waa in la soo celiya wakhti inta ka gaaban.

Dib u amaahsashada

Weli ma dhamaysan miyaa akhrisasha buugga?
Waa dheeraysan kartaa wakhtiga amaahsashada.
Taleefan noo soo dir ama na wargeli adigoo bogga Internetka adeegsanaayo
Ugu badnaantii laba jeer ayaa dib u amaahan kartaa.
Haddii qof kale u doonaayo in uu isla buugaas amaahdo waa inaad buugga dib u soo celisa.

Ballanso

Haddii aad doonayso inaad amaahato buug u qof kale amaahday. Waxaad naga codsan kartaa in an bugga ku balaminno. Taasoo loo yaqaanno ballansashada buugga.
Ballansahada buugga kala xiriir shaqaalaha rugta buugagga.

Waxaad kaloo ka ballansan kartaa bogga Internetka. Markii buugga la soo celiyo waxaan kugu wargelin doona warqad, e:mail ama farinta loo yaqaanno sms.

Markaas kadib ayaa buugga ka soo qaadan kartaa rugta buugagga. Toddoba maalmood ayaan buugga aad ballansatay ku hayn karnaa.

Waa inaad habsaamid la'aan soo celisa

Haddii aad la soo daahdo soo celinta buugga waxaa laga qaadayaa kharash.

Haddii aad naga codsato waxay rugta buugagga ku xasuusin kartaa soo celinta buugga saddex maalmood ka hor. Taasoo ka hortegeyso bixinta kharashka la soo daahida.

Waxaan kugu wargelin karnaa e:mail ama sms.

Waa inaad bixisa kharashka la soo daahida

Waxaan ku soo dirayna warqadda lacagta lagu bixiyo haddii soo celinta buugga aad la habsaanto.
Waaa inaad kharashka bixisa ama buugga soo celisa, haddii kale buug kale rugta kama amaahan kartid.

Lacag la'aan ayaa dhamaan xarumaha buugagga ee magaalada Västerås buugag ugu amaahan kartaa. Sidaaso kale lacag la'aan ayaa qamuusyada iyo wargeysyada ugu akhrisan kartaa.
Waxaad ku isticmaali kartaa kombyuutarrada Internetka leh, barnaamijyada wax lagu qorto iyo qalabyada wax lagu akhristo.